======================================

# #HORDHACA. .1-AAD

(waa Qalinkii: ZEEYLAC-BAALLI)

Kooxda >QAADYAANIGA.

AYAAN UGA hadlayaa. MAQAALKAAN .

-qaab JACBUR ah ayaana u qorayaa. qoraalka .

Qoraal tayo leh kama dhigaayo, waayo qolada aan ka hadlaayo Qoraalka, ayaa ah qolo aanan jecleeyn .

-----

-Waa MAQAAL KU SAABSAN URUR DIINEEDKA QAADYAANIGA.

-KOOXDA QAADYAANIGA inta aanan kaba hadlin QURAAFAADKOODA waxaa wanaagsan QURAAFAADKA ***AHLASUNA & SHIICADA*** rumeeysan yihiin in aan wax ka sheego.

-Qof ku mashquulid igama ahan balse MANHAJKA ayaan wax kasheegayaa, ama waan amaanidoonaa.

-Qofka isaga shaqsi ahaan hadii aad wax ka sheegtid

markoow berito fikirkiisa bedelo afkaarta, aad ku naqdisay maanta,waxaa qasab ah in aad adigana amaan ku bedeshid. sidaas ayaanan ugu mashquuleeynin hal qof ama laba waxa eey qaldeen ka hadalkooda.

-----------------------------------------------

**CINWAANADA OOW KA KOOBAN YAHAY MAQAALKA QEEYBTA 1-AAD.**

--------------------

#QOF QORAAL KA DIYAARIYAY OO  SOOMAALI AH MAJIRO

#Maxkamada marka leesla koro

#AHLAL QURAAN AYAA NAHAY

Qur`aanka &Xadiiska markeey is qilaafaan Aayada ayaan  ku dhaqanaa.

#SIRAADKA. majiro jidka siraadka.

#JIINLEEY. Aniga jiritaankeeyga Waa mid ku jaan go`an ,hadba halkaan joogo.

#SHEEQ KISHKI & SHEEQ SHIBILLE

SHEEQ KISHKI ayaa Sheeq inoo ah

#MIINLEEY,2024

Anigaan macbuudkeeyga Lafo&maqaar maahan.

HORDHACA. .3-AAD

Sida nacasyada Siyaasiyiinta ah

ee aanan AQLIGA tixgelinta siinin

Sidooda oo kale kuugu sheekeeynmaayo.

#SUUFINIMO ku dhisan yaanan Beer la tacbanin miyaan faafinayaa?

#ASHAACIRO JIILKOODA CUSUB  AYAA NAHAY MANA JIRO  CADAABUL-QABRIGA.

#AXAADIISTA.

Imaam al gazaali waa Imaamkeeyga dhanka SUUFINIMADA, Kitaabkiisa "Ixyaa culuumudiin" kama maarmo isagaas.

#AHLAL-QURAAN

-Sheekh MAXAMAD CABDU.

ayaa u aaba ah,isaga hortiis

SAXWO ma jirin.

#AHLAL QURAAN.

Aayadaha Quraanka  fasirkooda waxba uma harin  HEENSI BAA KASOO HARAY.

#AHLAL QURAAN

Aayadaan

(<u>Suma radadnaahum asfala saafiliin</u>)

Marka hore Jano ayaa nalagu dhex abuuray marka, aan Rabi ku caasinay

Dhulkaan ayaa nalagu sootuuray.

#AHLAL QURAAN hadaa nahay

SUUQA aan kasoo adeegano Fiqhi ahaan

Kitaabka Quraanka ayaa suuq noo ah

#AHLAL QURAAN.

Isbarbardhiga Aayadaha EEBBE.

Ayatalkursi & Ikhlaas.

#Kursiga waa ka balaaran yahay Dhulka &Cirka &CARSHIGA.

#AHLAL QURAAN.

ama

CILMIGA QURAANKA.

Inta xiiseeyso xididaha aasan ee xigmada Quraanka ku dhex qarsoon, kana fog quraafaadka faalaloowga ama tafaafuloowga.

#AHLAL QURAAN.

CARUURTII NABIGA DHALAY, MAGACYADOODA

Qur`aanka ayaa lagu dhex xusay .

Aayadaan ayaa tilmaantay arinkaas.

وَلَقَدْ آتَيْنَاكَ سَبْعاً مِّنَ ٱلْمَثَانِى وَٱلْقُرْآنَ ٱلْعَظِيمَ

- Nabiga waxaa la yiri , 7 ayaan kusiinay & quraanka kariimka ah .todobadaas Quraanka ku xusan waa hal xiraalaha Quraanka waxaana loola jeedaa Ubadka Nabigeena .

1) ........Al Qaasim.
2)........Cabdu Allaahi
3) .....Ibraahiim
4)...... Zaynab.
5)......Ruqayyah.
6) ......Ummu Kulthuum.
7).......Faadhimah.
====================================

-SANADKA 2026 HARGEEYSA & Y.HOOD in aan arimahooda ka hadlo ayaa wacneeyd balse CULIMADA SOOMAALIYEED sida eey udhan yihiin ASHAACIRO & SALAFI & SUUFI dhamaan wada jir ayeey go`aan uga qaateen arimahaas.

CULIMADA waxa eey go aamiyeen

ayaan ku qanacsanahay oo aan Qabri la gelayaa .

- CULIMADA Soomaaliyeed, SANADKA markoow ahaay 2006 waxeey kadigeen colaad shisheeye in gudaha Soomaalida loosoo raro. Dhiiga qulqulay ee Gaalka ka qubtay. Muslimkana ku halaagsamay,GAAL & MUSLIM waa ka wada dheregsan yihiin .Itoobiya ragii shalay xakunka uhaayay hadeer shalaay ayeey ka joogaan wiilashooda ku leday gudaha Soomaaliya. waxaas oo dhib ah waa laga maarmi karay hadii XASAN DAAHIR&SHEEKH SHARIIF(1) xakunka loo deeyn lahaay. iyaga ayaa dalka islaaxiyay hubkana ka dhigay mooryaantii loo maaro la`aay.

Maanta halkii 2006 ayeey HARGEEYSA taagan tahay. yaanan laga xanaajin Wiilka HARGEEYSAAWIGA AH.

Dhulkaas meel walba nabada ah. wacdiga culimada ayaa lagu helay nabadaas.

- wadaad QABIIL laxiiqsan oo colaad hurin kufoogan, dhan walbaba kasoo baar, kama soo dhex heleeysid CULIMADA SOOMAALIYEED .

Suufi iyo Salafi saf ayeey ka wada yihiin la dagaalanka Qabyaalada.

-In la jeclaado ISAAQ& HAYIYE .

DIGIL&DAAROOD.

Rabiga raxmaanka ah ayaan jano uga rabnaa. qabiil walbana qalbiga ayaan ka jecelnahay qeeyrka ayaan la dooneeynaa

Hanti in eey helaan hormarna gaaraan, aaqirana Jano helaan ayaan la jecelnahay

-isir ahaan Soomaalida 3 ayaan u qeeybiyaa

JAREER&JALEEC& GIBILCAD.

Qeeybta aanan hubeeysneey dhibkooda waa yaryahay fidno dhankooda kama soo fuucdo sidaas ayaanan usoo hadalqaadin.

-arimahaas  gudaha Soomaalida ka dhex socdo Culimada iyo waxgaradka kale ayaa in badan aad uga hadlay.  waxeey idiin sheegeen iyaga, uunbaan kusoo celinayaa, hadii aan damco in aan ka hadlo arimahaas.

=====================================

(1) 2026 XASAN DAAHIR Aweeys   arimaha  HARGEEYA ayoow kasoo hadalyay .marka aan dhageestay qaabka oow uga hadlay qaladaad tiro badan ayaa iiga soo dhex baxay ,GAALEEYSIIN ayaa ka dhex buuxday hadalkiisa waana dhaqan KHAWAARIJ lagu yaqiinay marka eey qaladyar ku arkaan qof walaal ah dhaqsaba in eey u degdegaan gaaleeysiinta.

taas ayaa igu kaliftay in aan qoraalkan ugu jawaabo ninkaas.

-qaladka  oow CIRO ka gelaayo Umada Soomaaliyeed qof qalin ku difaacaayo in aan ahay yaanan loo maleeynin .

qeeybta sare  ayaan idiinkugu sheegay.

Culimada ISLAAMKA  ayaan ku raacsanahay go`aanka eey ka qaateen

HARGEEYSA.qeeybaha danbe

ayaad ka aqrisan doontaa.

------------------------------------------------------------------------

#QOF QORAAL KA DIYAARIYAY OO  SOOMAALI AH MAJIRO

kooxdaan  QAADYAANIGA  ah haduusan Iga qarsooneeyn.

marka soow ma qurux badna in aan bilaabo in laga hadlo qoladaas magacooda yahay QAADYAANI ama AXMADIYA?.

-Merza Gulaam Axmad Buugaagta oow isaga qoray ayaan mid mid isku dultaagi doonaa .iyaga ayaa maxkamada inoo saaran balse waxyaabo eey dadkale ka qoreen isaga, masoo hadal qaadi doono. Sheekh Merza oo wax laga sheego Nedka ayeey ka buuxaan .

inaga uma socono wax kasheegid balse waa is barasho. waxaa la yiri barasho horteed yaanan lees nicin.

========================================

# #HORDHACA. .2-AAD

-Maxaa keenay in aan soo  aqristo  Kutubada oow qoray MAHDIGA kasoo ifbaxay HINDIYA&BAAKISTAAN ?.

1800-1900.

-  waxaan ahay nin ka shakisan Nabi Ciise  inoow ADUUNKA kusoo laaban doono.

-SHEEKH MAXAMAD.CABDU  waxoow yiri Nabi Ciise waa DHINTAY . si caadi ah ayoowna udhintay markoow ka badbaaday dilkii looqorsheeyay. dibdana

ugu soo laaban maayo ADUUNKA.

Aayado Quraan ah  ayoow soo texay kuwaas oo Nabi Ciise ku tilmaamay in oow dhintay. Sidaan dib ka arki doono.

إِذْ قَالَ ٱللَّهُ يٰعِيسَىٰ **إِنِّى مُتَوَفِّيكَ** وَرَافِعُكَ إِلَىَّ وَمُطَهِّرُكَ مِنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ

(Aala cimraan 55)

فَلَمَّا تَوَفَّيْتَنِى كُنتَ أَنتَ الرَّقِيبَ عَلَيْهِمْ

(maa ida.116)

Ibnu Cabaas waxoow ku fasiray

"فَلَمَّا تَوَفَّيْتَنِى"

goorta aad nafta iga qaaday.

hadalkaasna  Sheekh Merza ayaan kasoo xigtay balse meel eey ku qorantahay isma dultaagin.

- aniga waxaan rumeesnahay Nabi Ciise waxaa loo qaaday JANADA

waana sida Wiilasha  ku dhex qoran Suuradaan

[يٰسن 24-27]

إِنِّيٓ آمَنتُ بِرَبِّكُمْ فَٱسْمَعُونِ

قِيلَ ٱدْخُلِ ٱلْجَنَّةَ قَالَ يَٰلَيْتَ قَوْمِى يَعْلَمُونَ
بِمَا غَفَرَ لِى رَبِّى وَجَعَلَنِى مِنَ ٱلْمُكْرَمِينَ

CIISE& Wiilashaas waxa udhexeeyo ayaa ah iyaga waa la dilay balse isaga sida Nabi Aadan ayaa loo dhoofiyay

oo Malag ayaa Baalashiisa ku duuduubay sida Nabigeena loo dheelmiyay loona dhex geeyay Janada ayaa isagana loo qaaday. Janada Malag ayaa ka soosagootiyay oo tunkiisa kusoo qaaday.

----------------------------

-anigaan MAQAALKA soo qoray .

Mahdi Qureeysh ka dhalan doono qof sugaayo maba ihi.

-Qoomkii YAAJUUJ la dhihi jiray  in eey Jaxiimo u hoydeen sida Fircoon loo halaagay in loo halaagay  baan  rumeesnahay .

ama waaba  sir  Aduunka ku dhexqarsoon oo  xili xiliyada kamid ah la arki doono.

Qoraxda meel ka shishe ayoow gaaray thulqarneeyn inaguna Dayaxgacmeedka Doowladeena  Jabuuti, hawada udirtay, meel fog kama soowaramo.

-Qoomka Yaa-juuj waa ilmo Nabi Aadan & Xaawo, dhaleen.

SUNAHA Rabi ayaa ah in Sabuul beer kasoo go`ay ku noolaadaan Aadanaha , Roob la helo & Beero tacbasho.

(wa fi samaa`i rizqukum)

Qoom Nabi Aadan dhalay oo sida ABEESADA u nool oo ciida ka hoos kunool hadeey jiraan AQLIGEEYGA waa diiday.

jumlo ahaan uqaado YAA-JUUJ waa jiri jireen waana la halaagay Jaxiimo ayeey u hoyaadeen.

-XOORAL CEEYN waa jirtaa balse waa mida ADUUNKA timid Rabina caabuday camal eey sameeysay ayeeyna ku noqotay XUURAL CEEYN balse Gabar Janada iska dhex joogto aanan Aduunka usoo degin, kana soo hartay Xaawo& Aadan. midaas aanan danbaabin iska dhex degan Janada hadii eey jiri laheeyd Xaawo lamaba UUMEEN iyadaas ayaa Nabi Aadan loo aroosin lahaay.

Aakhiro waa meel leesku abaal mariyo  Aduunkana waa meel Rabi lagu caabudo Xooral ceeyn maba soo shaqeeysanin Aduunka maba imaanin sidee loo abaal mariyay una heshay Jano iyadoon wax dhibaato ah la kulmin Jano ayaa lagu dhex

dhalay Jano ayeey iska dhex joogtaa ,Nabi Xaawo iyada waa laga soo eriyay Janada. midaasna Janada iska dhex jiifo ayaa la yiri.

-yaanan hadal kuugu daalinin Xooral ceeyn waa jirtaa balse waa gabdhaha Aduunka. iyagaas uunbaa Aakhiro dib u cusbooneeysiin lagu sameeyay, dahaarkii Bikro nimo lagu soo celin doonaa.jirkoogana sida Dahabka loo iftiimin doonaa. Xooral ceeynta kale waa sida Gabareey maanyo wax jiro ma ahan, haku hungoobin maandhaheey.

**-Dajaal Ileey isna maba rumeesni.**

Rabi isagaa yiri  gaalada Tixsi ma uumi karaan.

إِنَّ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ لَن يَخْلُقُواْ ذُبَاباً وَلَوِ ٱجْتَمَعُواْ لَهُ

Dajaalka lasugaayana qof dhintay ayoow soo nooleeyn karaa. qof ayoow dilayaa hadana dib usoo nooleynayaa.

Jano iyo Naar ayoow Uumayaa. marka waxaa la dhihi karaa Rabi  ayoow la awood yahay.

sidaas ayaan ugu KUFRIYAY DAJAAL CAWAR mana rumeesni

Taas baa keentay in aan aqristo ninkaan MAHDIGA sheegtay MAQAALADIISA.

waxaan is iri amoowba yahy NABI CIISAHA lasugaayay balse la garan waayay.armeey Umada iska diiday oowna ahaay NABI CIISE oo  soo ifbaxay Umadana garan weeyday.

sida Y.H.DA.(1) u aqoonsan weeysay NABI MUXAMAD.

-Hala yaabin arinkaas Nabi Ciise tilmaamo ayoow leeyahay lagu aqonsado anna waatii aan iska diiday waxaas oo tilmaamo ah. marka waa in aan aqoonsadaa isagoonan wax tilmaamo ah wadanin Nabi Ciise.

-hadii oow maanta soolaabto Nabi ciise oo aan iska diido isaga.

 oo aan raaco  QURAANKA waxaa xaqiiqo ah  in aanan ku gaaloobeeynin.

-MAHDIGA la sugaayo SUNI&SHIICO wada sugayaan  kana dhalan doono QUREEYSH

isagana waa lamid. qofkii iska diido kuna dhegan QURAANKA diintiisa waa meelna kama jabna.

-wadaad MASAARI ah kaasoo noolaay

1800-1900.

magaciisuna yahay  MAXAMAD CABDU

Isaga ayaa keenay in laga shakiyo imaanshaha Nabi Ciisw.

-NABI CIISE manoolyahay mise waa dhintay.

Fasir cusub ayoow Quraanka dulsaaray.

qeeybaha danbe ee isla qoraalkaan  ayaan uga hadli doonaa arimaha Wadaadkaas MASAARIDA AH .

-SHEEKH RASHIID RIDA.

waxoow Tafsiirkiisa ku sheegay in oow dhintay Nabi ciise

ka eeg Mujaladka 3-AAD

boga 262.

-MAHDIGA aan ka hadli doono isaguna waxoow yiri

NABI CIISE WAA DHINTAY Quraanka ayeeyna ku cadahay.

:::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::::

.(1) Dagaalkii GAZA waxii ka danbeeyay dhib ayaa ka jiro Internedka Algoriisamka ayaa ku badan ama faafreebka.

Y.HOOD yaanan la cunsuriyeeynin yaanan wax laga sheegin qolyo dhahaayo ayaa iskaleh Internedka.

amaan ama wax ka sheeg. marka aan ka hadlaayo Diintaas, magacooda sidaan ayaan u qori doonaa Y.HOOD.

------------------------------------------------------------

# #AHLAL QUR'AAN.

(laa ya tiihil baadhil min beeyni yadeeyhi..)

Qur`aanka ayaa miizaan inoo ah. xadiiska Nabiga haduu noqdo mid ka hor imaanaayo Qur` aanka isagaas ka horyimid meel baan iska dhigeeynaa oo kuma dhaqmeeyno.

**"al jarx wa tacdiil"**
waxaa noogu filan Qur`aanka.
-Dhiiga Muslimiinta daadintiisa uma socono sida Khawaarijta.
mana usocono Dadka hantidooda.
-qofka in oow ka rooro Qu`aan hadii lasoo hadal qaado ayaa lagaar siiyay.

qof macangag ah oo marya kudheg ah ayeey aamineen dadkeena. qoladaas ma nihin.
-Miizaanka Qur`aanka ,waa miizaan cusub.
xiligii hore Xadiiska waxaa miizaan looga dhigi jiray Raga laga soo weriyay ama raga kasheekeeyay Xadiiska. qof walba taariikhdiisa ayaa la soo baari jiray.

2000 oo sano kahor Rag noolaay inaga garan meeyno Carab cida eey ka ahaayeen. run sheegid ama been sheegid.
Xadiis walba waxaan saareeynaa miizaanka aayada. hadeey isku jinn noqdaan waa sidaan rabnay hadoow wax ka badan aayada la yimaado Xadiiska weliba oow qilaafo Qur`aanka,xadiis la tuhmo ayaan u aragnaa mana qaadaneeyno .

=====================================

**#Maxkamada marka leesla koro**

Caadifad u hadalka waa laga fiican yahay

Wada dhalasho ayaa naga dhexeeyso

& waano albaab keeda waa xiran yahay.

qolo walba daliilkeeda in eey la gole timaado ayaa haboon.

-kutubada qaar waxaa loo qoraa in la cadeeyo QILAAFKA ama KAALAY AAN MURANEE ayaa loo qoraa.

Moowduucaan aan ka hadlaayo ayaaba ku dhisan

MURAN&ISMAANDHAAF DIINEED.

hada kahor Laba Saxaabi ayaa Masjidka ku dhex murmayeen, Lacag ayeeyna ka doodayeen Nabiga ayaa gartooda soo kala dhexgalay.

Maal aduunyo ayaa Masaajid dhexdiisa looga dooday. inaga DIINTA ayaan ka hadleeynaa siiba wax aakhiro ku saabsan hoowl aduunyo kuma saabsana doodeena.

**Afkaarta hadii xor laga dhigo** wax walba ubadka loo cadeeyo, haku qanco ama ha iska diido yeelkadiise waa sheey aad u quruxbadan .

وَقُلِ ٱلْحَقُّ مِن رَّبِّكُمْ فَمَن شَآءَ فَلْيُؤْمِن وَمَن شَآءَ فَلْيَكْفُرْ

(al kahf 29)

# #AHLAL QURAAN AYAA NAHAY

Qur`aanka &Xadiiska markeey is qilaafaan Aayada ayaan ku dhaqanaa.

Quraanka ayoow Eebbe nagu adoonsaday in aan isaga raacno .

وَٱصْبِرْ نَفْسَكَ مَعَ ٱلَّذِينَ يَدْعُونَ رَبَّهُم بِٱلْغَدَوٰةِ وَٱلْعَشِىِّ يُرِيدُونَ وَجْهَهُ

(Al kahf 28)

"garta laba ku dooday"

waxaa jiro doodwanaag iyo muran.

doodwanaaga ama garta oo laga doodo waa sheey wanaagsan .

Tusaale: Nabiga naagbaa la dooday sida Quraanka ku dhigan .

(qad samica laahhu...)

midaas muran ma ahan balse waa garta oo laga wada hadlo,Carabta waxeey utaqaanaa

(XIWAAR)

muranka ama hagag ayaa wax xun ah .

xaqa isagoo kuu cadyahay oo aad hareer martid.

Maxkamad marka leesla aado

Caadifad u hadalka waa laga fiican yahay.

Wada dhalasho ayaa naga dhexeeyso

& waano  albaab keeda waa xiran yahay.

qolo walba daliilkeeda in eey la gole timaado ayaa haboon.

-kutubada qaar  waxaa loo qoraa in la cadeeyo QILAAFKA ama KAALAY AAN DOODNEE ayaa loo qoraa.

Soomaalida dhexdooda DOOD waxeey u yaqaanaan mida TV&IDAACAD laga siidaayo.

Buugaagta in lagu dhex doodo ayaa ka qurux badan, waayo Buuga lama jarjari karo marba haduu daabacan yahay cid walbaa dib ugu laaban karto.

Moowduucaan aan ka hadlaayo ayaaba ku dhisan DOOD&ISMAANDHAAF DIINEED.

-Hada kahor Laba Saxaabi ayaa Masaajidka ku dhex doodayeen Lacag ayeeyna ka doodayeen Nabiga ayaa gartooda soo kala dhexgalay.

Maal aduunyo ayaa Masaajid dhexdiisa looga dooday inaga DIINTA ayaan ka hadleeynaa siiba wax aakhiro ku saabsan hoowl aduunyo

ma ahan .

Afkaarta hadii xor laga dhigo wax walba oo Islaamka ku saabsan  ubadka loo cadeeyo haku qanco ama ha iska diido yeelkadiise waa sheey aad u quruxbadan .

(famanshaa a fal yumin waman shaa a fal yakfur)

-CADAABAL QABRI (1)majiraa mise majiro waa wax leesku qilaafay qofka markoow weeynaado oowna wax baaro kadib in oow ogaado waa wax laga qurux badan yahay.

-MAHDIGA dhalandoono waa wax leesku qilaafay.

-Dajaal ileey waa wax leesku qilaafay majiraa mise maba jiro.

-Yaajuuj qoom hada nool waaye iyo ma ahan waa qoom la halaagay waa hore iyadana waa wax leesku qilaafay.

-Nabi Ciise waa dhintay iyo ma dhimanin balse Cirka ayaa loo dheelmiyay arinkaas waa wax leesku qilaafay.

-AHLAL QURAAN ayaa nahay Injiilka Masiixiyada  ee bugta ah Axaadiis laga soo minguuriyay Caqiido kama dhigano Nabi Ciise

imaanshahiisa

kuwii sugayay maba nihin.Naarta ma gelin Nabigaas balse Janada ayoow dhex joogaa.

-Mahdiga haduuba jiro waxoow noqon doonaa Nabi loo waxyoodo sida aan ku arki doono Aayado aan hadhoow idinla aadaagi doono.

Nabi Ciise haduu yahay midkaas imaan doono ee Eebbe u waxyoon doono markaas kaba siifiican .masa aaminsani aniga waan ka maagay labadaas oo kala ah, Mahdiga iyo Nabi ciise. balse Aayada waa lasoo bandhigaa hadii eeysan adiga ku taageersaneeyn si eeysan u noqonin in Xaqa la qariyo inta aad adiga rabtid uun lasoo bandhigo.

AAYADO ayaan ka hadleeynaa balse Xadiis ma ahan xujadeenna.

-AHLAL QURAAN hadalkaas ayaan halxiraale uga dhigay

bal halasii sheego Aayada aan usoo daliishan doono

in Mahdiga loo waxyoon doono ama Nabi Ciise

halxiraalaha aan xujadda ka dhigay hadii aan sii jilciyo, Quraanka waxaa loo qeeybiyaa "awal&aakhir"

Aayadaas tilmaantay in oow jiri doono Nabi imaan doono loona waxyoondoono waxeey ku qorantahay "aakhir"

qeeybaha danbe ee Qur`aanka. Suurada Alkahfi ilaa Juz cama.

**----**

## -Nabi Muxamad xaguu joogaa?.

markaad tiraahdid Ahla-suna&Shiico, jawaabtooda waxa waaye

,

Iilka ayoow dhex jiifaa.

(fariiqun fil janati wa fariiqin fi saciir)

Aayada Quraanka waxeey tilmaantay qofkii dhintay Jano ayoow dhex joogaa ama Jaxiimo.

balse dadkeena waxeey dhahaan CADAAB QABRI ayaa jirto Jano waa danbeeysaa Naartana sidookale.

-Y.HOOD waxeey dheheen  Naarta  ayaan  geleeynaa dhoowr maalmood.

(lan tamasana naar ilaa ayaaman macduudaatin)

-KIRISHTAANKA ama MASIIXIYADA Waxeey dheheen NAARTA  NABI CIISE ayaa galay

Isaga ayaana noo denbi dhaafay.

-MUSLIMIINTA waxeey dheheen

Nabi Muxamad Naarta ayoow dulmari doonaa SIRAADKa AAKHIRO.

waa jid la wada dulmari doono, NAARTA ayoowna ku dul yaalaa.

hadalkaas waa wax QURAANKA QILAAFSAN .

Bal waxaad qiyaastaa NABI MUXAMAD oo maryaha kor u xeeytay sida Oday Mudulood ah oo joogo maalinta debashidka, kana dulboodaayo 9 Deb oo Beeshiisa shidatay.

Ama Oday Biyamaal ah oo Debshidka udabaal degaayo , hadba dhinac uga dulboodaayo.

Sanadka cusub marka lasoo dhaweeynaayo sanadka Soomaalida

.

--

**#SIRAADKA.**

(fahduuhum ilaa siraadil jaxiim)

jiritaanka Jidkaas Imaam Algazaali Aayadaas ayoow usoo daliishaday .

balse Aayadaas dadka eey ka hadleeyso waa gaalo, balse Muslimiin ma ahan .

Rabi waxoow dhihi doonaa " tusa jidka Naarta loomaro" sidaas ayaana loola jeedaa.

-bal adigaba qiyaas Nabi Muxamad oo lagu abaal mariyay in lagu jiheeyo jidka jaxiimo.

-dabcan qofka sidaas u fasiraayo Quraanka waa damiin.

ٱهْدِنَا ٱلصِّرَاطَ ٱلْمُسْتَقِيمَ

صِرَاطَ ٱلَّذِينَ أَنْعَمْتَ عَلَيْهِمْ غَيْرِ ٱلْمَغْضُوبِ عَلَيْهِم وَلاَ ٱلضَّآلِّينَ

Jidkaas eey Faatixada ka hadashay waa jidka janada, marka qiyaamo la joogo.

laba jid ayaa halkaas jiro midka jaxiimo&midka janada.

-Aayadkale ayaa tilmaantay oo kooxo-kooxo iyagoo ah ayaa loo sii kaxeeyn doonaa Jana dhankeeda oo jidka Janada ayaa lagu hagi doonaa balse Jid Jaxiimo dul maraayo laguma hagi doono Muslimiinta.

وَسِيقَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِلَىٰ جَهَنَّمَ زُمَراً

(71 Zumar)

وَسِيقَ ٱلَّذِينَ ٱتَّقَوْاْ رَبَّهُمْ إِلَى ٱلّجَنَّةِ زُمَراً حَتَّىٰ إِذَا جَآءُوهَا وَفُتِحَتْ أَبْوَابُهَا وَقَالَ لَهُمْ خَزَنَتُهَا سَلاَمٌ عَلَيْكُمْ طِبْتُمْ فَٱدْخُلُوهَا خَالِدِينَ

(73 Zumar)

-------------------

Mp3 kitaabka ixyaa.

2-5.

Saacada 4:00.

Rubaca cibaada .kitaabka Qawaacid al caqaa'id.ayoow ku sheegay Gazaali.jidka Siraadka

Waana qalday halkaas.

---------------

-Ahla Suna waxeey dheheen .BANKa AAKHIRO marka la joogo dhar lamaxirna  waa la qaawan yahay ayaa la sheegay warkaasna waa wax Quraanka qilaafsan

(Nuuruhum yascaa beeyna eeydiihin)

Ileeys baa na hareeyay ISTABRAQNA ayaa dhar nalooga dhigay dhar Xariir ah ayaa hugeena yahay maalintaas. Kan qaawan malaha waa midka GAALKA ah balse Muuminka ma qaawana maalintaas , maalin la abaal mariyo waaye balse maalin la hoojiyo ma ahan qofka Muuminka ah.

-JADAAL ILEEY NABI SOO IFBIXI DOONO MIYAA?.

Ha umaleeynin in aan ahay nin waxaas rumeeysan.

adigaan aqristaha ahna hadii aad weli rumeeysan tahay Allaha kaa soo hanuuniyo, quraafaadkaas caqiidada nalooga dhigay caruurnimadeena.

hadhoow ayaan si wanaagsan u falanqeeyn doonaa asalka fikirkaas xagee Islaamka looga soo daray ma Giriiga mise Masiixiyada?.

-DAJAALKA haduu sida Nabi ciise qof dhintay soo nooleeyn karo JANO&NAAR la imaan karo markaas GAAL maba ahan

waa MUSLIM waxaana lasiiyay Xujo sida Nabi Muuse Usha loosiiyay, waxoowna mudan yahay in la rumeeyo Diinta oow la imaan doono.

Duuduub ayaan udiiday Dajaalka sheekadiisa wax jiro ma ahan.

Nabigeena waxaa lagu xujeeyay QASRI DAHAB AH &hanti farabadan, si Diintiisa Qureeysh uga qaadato .waxaa la yaab leh

Nabigeena in aanan wax mucjizo ah la siinin balse DAJAAL la siindoono Mucjizooyinka ugu waaweeyn

Si oow dadka ugaaleeysiiyo.

-DAJAAL JANO&NAAR ayoow keensan doonaa

waxaa midaas diidan Aayadaan Quraanka ah .

Nabi Muxamad ayaa lagu xujeeyay in dhanka Rabi laga siiyo Beer wax walba eey u dhan yihiin eeyna dhex marayaan Webiyaal.

hadiiba Nabi Muxamad aanan lasiinin GAALKA DAJAALKA ah in si mucjizo ah loo siiyo waa wax aanan dhici doonin , Quraankaas ayaana diidan .

وَقَالُواْ لَن نُّؤْمِنَ لَكَ حَتَّىٰ تَفْجُرَ لَنَا مِنَ ٱلأَرْضِ يَنْبُوعاً (٩٠)

أَوْ تَكُونَ لَكَ جَنَّةٌ مِّن نَّخِيلٍ وَعِنَبٍ فَتُفَجِّرَ ٱلأَنْهَارَ خِلالَهَا تَفْجِيراً (٩١)

أَوْ تُسْقِطَ ٱلسَّمَآءَ كَمَا زَعَمْتَ عَلَيْنَا كِسَفاً أَوْ تَأْتِيَ بِٱللَّهِ وَٱلْمَلاۤئِكَةِ قَبِيلاً (٩٢)

أَوْ يَكُونَ لَكَ بَيْتٌ مِّن زُخْرُفٍ أَوْ تَرْقَىٰ فِي ٱلسَّمَآءِ وَلَن نُّؤْمِنَ لِرُقِيِّكَ حَتَّى تُنَزِّلَ (٩٣)
عَلَيْنَا كِتَاباً نَّقْرَؤُهُ قُلْ سُبْحَانَ رَبِّي هَلْ كُنتُ إَلاَّ بَشَراً رَّسُولاً

==========================================
========

Aayadaan waxeey tilmaantay in qof gaal ah ama Sanam oowsan abuuri karin

tixsi ama wax u dhigmo.

لَن يَخْلُقُواْ ذُبَاباً وَلَوِ ٱجْتَمَعُواْ لَهُ

DAJAAL waa nin gaal ah in oow wax dhintay soo nooleeyo sida Nabi Ciise

Aayadaan ayaa diidan , hore uma dhicin mana dhici doonto

يٰأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ضُرِبَ مَثَلٌ فَٱسْتَمِعُواْ لَهُ إِنَّ ٱلَّذِينَ تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ لَن يَخْلُقُواْ ذُبَاباً وَلَوِ ٱجْتَمَعُواْ لَهُ وَإِن يَسْلُبْهُمُ ٱلذُّبَابُ شَيْئاً لاَّ يَسْتَنقِذُوهُ مِنْهُ ضَعُفَ ٱلطَّالِبُ وَٱلْمَطْلُوبُ

[سورة الحج..73]

-arimahaas aan kasoo waramay waa afbilaaw ama hordhac waxa aan hadhoow ka faaloon doono ayaa waxyaabahaas ah.

Kusoo durug dersigeenaas ama kasii durug

hadaadoontid,dib hadaad u dugtana Suuqyada doodaha lagu iibinaayo aad soo wada aragtid wax maangal ah aniga ayaad iigu imaandoontaa.

Midna aan kuu raaciyo moowduucaan waa mid aad uqaraar.

10 sano ah ka hor warkaan aan maanta halkaan ku qoraayo qofka iila yimaado anigaba kama qaateen. balse wax aan ku qanco ayaan waayay. Quraanka qaabka oow uga waramo QIYAAMAHA isaga ayaan ku qancay.isaga ayaana MAD-HAB

ka dhiganay.

---

==========================================

(1)BUG AHAANTA, CADAABTA QABRIGA

maqaal ayaan ka qoray, cin waankiisa yahay

" JIILKA CUSUB EE ASHAACIRO, MA RUMEEYSNA CADAABUL-QABRI"2025

qofka u baahan faah-faahin  halkaas haka aqristo.Axaadiista Nabiga inta ku dhigan Buugaagta Bukhaari&Muslim ayaan usoo  daliishaday Quraankana daliil ayaan uga keenay in oowsan jirin Cadaab Qabri balse waxaa jiro JANO ama NAAR.

- Qofka dhintay  Qof toosan haduu ahaay Aayada waxeey tilmaantay sidaan .

فَأَمَّآ إِن كَانَ مِنَ ٱلْمُقَرَّبِينَ

فَرَوْحٌ وَرَيْحَانٌ وَجَنَّتُ نَعِيمٍ

Nabi Muxamadna Jano ayoow u hoyaaday ayeey Aayadaas tilmaan u tahay.

balse Iilka isagoo dhex jiifo Jano looguma dhex keenin.

-Qofka dhintay haduu sida Fircoown ahaay iyadana Aayadaan ayaa ka warantay.

وَأَمَّآ إِن كَانَ مِنَ ٱلْمُكَذِّبِينَ ٱلضَّآلِّينَ

فَنُزُلٌ مِّنْ حَمِيمٍ

وَتَصْلِيَةُ جَحِيمٍ

qofka dhintay Jano&Naar  labadaas ayoow mid uun jiraa. Fircoown Qabriga laguma dhex cadaabaayo balse Naarta ayoow toos u galay , Nabi Muxamadna Jano ayoow u hoyaaday. nuxurka maqaalkaas waa intaas.

=Cadaabta Qabriga waa mid laga soo dheegtay dhanka MASIIXIYADA.

Injiilka "looqa.isxaaxa 6-aad ,aayada 22.

Injiilka"mataa"isxaaxa 18.aayada 8-aad.

halkaas ayaa looga waramay jiritaanka cadaabta qabriga.

Injiillada Aduunka dul yaal mar walba waxbaa lagu daraa lagana dhimayaa .hadalkaas tilmaamayo Cadaabta Qabriga hada Injiilka aan heesto PDF ka ah kuma qorna.

 waxeey ahaataba. Quraanka ma sheegin wax la dhaho cadaab qabri .maqaalkaas cinwaan kiisa kor ku qoran  qeeybtiisa labaad weli diyaarin baan ku wadaa goorta aan sii daayo ayaan wax badan kaga hadli doonaa Injiilka waxa oow ka yiri cadaabta qabriga.

======================================

# #JIINLEEY.

Aniga jiritaankeeyga

Waa mid ku jaan go`an ,hadba halkaan joogo.

Qof jiraan ahay ma dhihi karo markaan SUUFIYADA agjoogo

Taas ayaaba SHIRKI ah

كُلُّ مَنْ عَلَيْهَا فَانٍ

وَيَبْقَىٰ وَجْهُ رَبِّكَ ذُو ٱلْجَلاَلِ وَٱلإِكْرَ

(araxmaan .26/27)

Aayada kale waxeey tiri:

(<u>limanil mulkul yoowm lilaahil waaxid al qahaar</u>)

Maalintaas oow Rabi dhihi doono hadalkaas hadii aadan ku jawaabi karin " aniga"

hadeerba maxaad u tiri wax jiro ayaan ahay . ha dhihin wax jiro Ayaan ahay, edeb yeelo.

Rabi waa jiraa ,anigana qof jiro ayaan ahay in eey dhahaan ayeey ka sariigtaan SUUFIYADA.

**-ILLAAH waa jiraa**

Jiri taan kiisana

Kuma jaan go`na CARSHIGOOW dul joogaa.

Carshi&Kursi maba jirin  Illaahna waa joogay weligiis.

-Abwaan keenii Reer Jabuuti  Cali mooge Geedi gabaygiisa waxoow ahaay

"Illaaheena jiro maahee illaah kale majiro"

**-Jibriil looma abuurin**

Jaceeylka Nabi Muxamad looqabo .

hadalkaasna waxaa daliil u ah .

هَلْ أَتَىٰ عَلَى ٱلإِنسَانِ حِينٌ مِّنَ ٱلدَّهْرِ لَمْ يَكُن شَيْئاً مَّذْكُوراً

(suurada al insaan)

Ilmaha  Nabi Aadan dhalay Nabigeena  ugu fadli badan

Uunka dhamaantiis isagaa ugu kheerbadan,balse Malag

Kama fadli badna Nabigeena.

Maxaa u daliil ah hadalkaas?.

Aayadaas aqriso

هَلْ أَتَىٰ عَلَى ٱلإِنسَانِ

-Nabigeena waa in saan ,Ilmaha Nabi Aadan dhalay ayoow ka mid yahay

yaanan lagu hungoobin hadalka ku qoran Injiil-Barnaaba.

Qisadaas bugg waaye Aayada Qur`aanka ayoow baalmaray Injiilkeenaas saxiixa ah."Injiil Barnaaba" ayaan ula jeedaa.

---

**ABUU XASAN AL ASHCARI.**

Aayada Qur`aanka qaabka oow u fasiray Ayaan ku raacnay

Balse muqalid ahaan uma qaadanin mad-habtiisa .

**Carshiga&Kursiga**

Kursiga ayaa ka qaraweeyn Carshiga.

Carshiga waxaa Aabahiis ah Kursiga.

وَسِعَ كُرْسِيُّهُ ٱلسَّمَاوَاتِ وَٱلأَرْضَ

(Aayada Kursiga)

-Carshiga Malaa`ig ayaa hada xanbaarsan

xiligaas ka siihorna  Biyo ayoow dul ooli jiray.

Biyaha Bada waxeey dulyaaliin dhul godan oo loo diyaariyay sida  haada samada duusho ma ahan.

(wa kaana carshuhu calal maa`i)

**-Rabi Carshigoow** duljiifaa xagee Diintaan looga soo daray?

Kitaabka Masiixiga

>sifir al ru`ya<

Ayeey kasoo dheegteen. halkaas ayeey kuqoran tahay.

Nabi Ciise sida Wankii ayaa loo goowracay. kadibna Carshiga ayaa loo qaaday halkaas ayoow la joogaa Rabiga na uumay Sidaas ayeey dheheen qaar kamid ah Masiixiyada.

halkaas ayeey naga soo gashay fikradaas balse Quraanka masheegin.

-kooxda MUJASIMO ayaa fikradaas Muslimiinta ku dhex faafisay asal ahaana halkaas ayaa laga soo minguuriyay.

--

Culimadii hore Buug markeey qorayaan

Buuga jaldigiisa ayeey ku sheegi jireen SHAAFICI, ama MAALIG, ama Abuuxaniifa

Qofka qoraalka qoray mad-habta oow heesto si loo garto.

MUCTAZILO haduu yahay waaba ku faani jiray.

Dadkii hore Dad is qariyo ma ahaan jirin. caqiidadeeyda waa MUCTAZILO ayoow dhihi jiray qofka.

**-Dalka USA**. dal dimoqoraadi ah ma ahan

laba xizbi uunbaa talada ku loolamo. mid 3-aad kama jiro halkaas.

waxaa xusid mudan qofka hadlaayo ee Mareekana ah

dal ahaan ka sokoow astaanta xizbiga ayoow ha googan yahay , Calanka Mareekan qof walba oo labada xizbi ka tirsan  ayoow gadaashiisa yaal balse qof walba xizbi ayoow ka tirsan yahay , si bulshada u aqoonsato cida la hadleeyso iyaga.

وَجَعَلْنَاكُمْ شُعُوباً وَقَبَآئِلَ لِتَعَارَفُوْاْ

[الحجرات 13]

Xizbiga marboow sida Qabiilka noqon karaa, wax lagu kala aqoonsado Umada.

**-qofka Soomaaliga ah**

ee wax qoraayo, ama muuqaal duubayo ,waxaa wanaagsan in oow hordhaca ku sheego, Caqiidada cida oow ka qaatay culimo ahaan .

ASHACARI haduu yahay ama reer  Ibnu Teeymiya .

Si aanan loogu jaha wareerinin shacabka .

AHLA SUNA Ayaan ahay balse culimadeeyda waan qarinayaa ,midaas dadka caamada ah ayaa lagu qaldi karaa

Qofka  maqaam sare ka gaaray aqoonta diinta lama qaldi karo qofkaas, waa qof waxwalba soo aqriyay.

-XANAABILO ayaa badan beryahaan  afka ka sheegato SHAAFICI balse dhaqanka Xanbali ka  ah ,Caqiidana Ibnu teeymiya.

-Halagu jeclaado ama halagu naco.  Sheeqa aad caqiidada ka qaadatay waxba ha qarinin. Afkaarta waa mid Kutubo ku dhex

qoran 1000 sano kahorna wax laga qoray wax laqarin karo ayaanan jirin.

casriga aan hadeer joogno (AI) ayaa Aduunka ku soo biiray Qalin ayoowna qaatay.

-------------------

-mooduucaan aan ka hadlaayo MUQALID kuma ihi qofna Sheeq iiguma ahan

SHAAFICI ama ASHCARI

Waa aniga iyo ijtihaad keeyga.

Qofka markoow soo minguuriyo afkaaraha Umadaha kale ama afkaaraha Muslimiinta eey hore u qoreen.

qofkaas MUJTAHID in oow isku magacaabo ma ahan .

Qofkii rabo in oow aqristo wax yaabaha aan curiyay ha aqristo AHLAL QURAAN

Marka aan ka hadlaayo ,Aayad walba FASIR CUSUB ayaan dul saaray tafsiir aanan cidna iiga horeeynin .

<u>(wa ladiina jaahaduu fiinaa la nahdiyanahum …)</u>

Beerta waa la geedqaadaa kahor inta aanan miro lagu beerin ,kadibna coowska ayaa laga jaraa .

Diintana waa lamid

Qalbiga oo xiqdi laga xalo ayaa ILHAAMKA lagu helaa

Kitaabka ‘IXYAA culuumudiin’ayaa in badan looga hadlay arimahaas.

Aniga qof jiro ma ihi markoow SUUFIGA dhahaayo dabcan qalbigiisa xiqdi ama xasad waa ka xalan yahay xiligaas xaalado kale ayoow ku sugan yahay xiliyadaas ayaa ILHAAMKA la helaa.

---

#SHEEQ KISHKI&SHEEQ SHIBILLE

Shibille waa nin Shaafici ah balse Ashcari ma ahan

Shaqsi ahaan uma aqaano shaashadahaas uunbaan ka bartay .

qofka  hadoow wax  sheeg-sheego oowna Shiiqyadiisa ka faaloodo sidaas ayoowba kuugu sheegay cida oow yahay.

-SHEEQ KISHKI ayaa Sheeq inoo ah

-dhanka Rabi ayeey  Oowrteena u rarantahay.

 Ama  Oowrteena looraray.

-Culimadeena

Ashaaciro hadii eey  daalimiin yihiin

(ina laaha laayahdil qoowma daalimiina)

Shareecada yaa fasiray oo Dunida ka shaac baxay aanan ashcari eheeyn bal noosheega?.

Imaam Nawawi Kitaabka  Imaam Muslim qoray ee saxiixa ah isaga ayaa sharaxay. Shalay markoow sharaxaayay Sheeq Shibille cidiisa waa joogeen,

Muran   ayeey Masjidka la dhex fadhiyeen.

Waxaa la yaab leh xili Tataarka meel walba oow gaalnimo la taagan yahay Gurigii Muslimiinta ama Dalalkeena oow kusoo duulay. Shibille Sheeqiisa 800 oo sano kahor waxoow ku mashquul sanaay wax kasheegida ASHAACIRO.

-Aqristoow aan ku weeydiiyo, Kutub aad adiga qortay intaan soo qabsado kadibna aan isagaas wax ka dul alifo KOMENTI ama TACLIIQ

Waxba ma dhaanto dhaqankaas.  curin lama dhaho dhaqanka nuucaas ah qofka la haado.

Aniga  hadeer hadalkaan qoraayana marka aan QAADYAANIGA naqdinaayo wax cusub sooma kordhin balse isaga ayaan KULA DAARTAY. Moowduucyada oow ka hadlay ayaan aad ugu mashquulay uun.

-waxqabadka Ashaaciro.

Kitaabka Bukhaari Ibnu Xajar ayaa tafsiir saaray Umadana weey aqbaleen .

ASHAACIRO waa kuwaas Muslimiinta hormarkaas  beey uhorseedeen.

Imaam Algazaali ayeey eeda saaraan. bal u fiirso xiligiisa Suni imisa ayeey xakumayeen JUQIRAAFI ahaana usoo geeg.

Dalka Masar Shiico ayaa heeysatay. bar yar ayeey ka talinayeen SUNIGA.

Inaga miyaa hawada sare geeynay Ahla suna mise waan hagranay bal hanaloosheego.

-Gaaleeysiinta Shibile oow Sheekheena gaaleeysiiyay waa gaaleeysiintii FIRCOOWN gaaleeysiiyay Nabi Muuse.

Shibile waa nin Muslim ah balse markoow daalim yahay in loo mujaamaleeyo ma ahan  runta aanan loosheegin .

-maxaa kalifaayo in oow kudhiirado wax gaaleeysiinta.

FAQIIH waaye SHIBILLI.

FIQHIGA  qofkii badsado qalbiga ayaa qalalo.

Imaam Al-Gazaali waa mida ku kaliftay in oow SUUFI noqdo.

- Cilmi ku dhisan wax kasheega MAALIG,ABUU XANIIFA,ama SHAAFICI.

Wax ku saabsan AXKAAM ama  wax ku saabsan QAADI-NIMO

Laba qof oo hanti ku muransan kala xugmintooda. Waxaas iyo waxa lamidka ah.

FIQHIGA Culimada waxa dilay ayaa waxaas ah .

GAZAALI cilmiga FIQHIHA waxoow kadhigay cilmi ADUUNYO.

-FIQHIGA QURAANKA oow ka hadlaayo

Midkaas qalbiga ayoow daweeyaa.

Balse FIQHIGA imaam yada curiyeen waa mid ,aanan dhameestirneeyn.

-SHIBILLE Cilmu raqaa-iq ayoow ka qaday ama cilmiga SUUFI nimada.

- Keenyaatiga GAALKA ah  ee Catabka xiran ee Kaniisadiisa kuu muuqato,

dhiigiisa in la daadiyo DASTUUR  kuu diidan haduu jiro.

Dadka Soomaaliyeed DASTUUR xuquuqdooda dhoowro ayaa loo qorayaa .

DASTUUR la qoro laba koox ayaa diidan

MOORYAAN GEREEY& MOORYAANTA BADA.

-sanadka 2000-kii Doowladeena Jabuuti, Carta ayeey Soomaalida iskugu yeertay

Waana 25 sano kahor Culimo badan weey taageereen Doowladii lagu soo dhisay CARTA.

-Xamar xiligaas Shacabka ayaa biyo wasaq ah la cabsiinaayay

Waad cayishay darteedna canshuur ayaa looga qaadaayay qofka cayilan ,is miizaan ayaa la dhahaayay .

BOOSAASO xiligaas Mooryaan waxaa jirtay inta dadka Doonyo ku qaaado BADA YAMAN inta dhexbartankeenda geeyaan

Ku yiraahdo ka deg Doonta ama Xabadaha Baaska ah u adkeeyso.

Dad waxaan arkaayay ilintooda qubaneeyso markeey maqlaan LIIBIYA ayaa doon Soomaali kabuuxday bada kula haloowday kuwaas waa qalbi fiican yihiin balse waxeey ilooweeen waxa eey sameeyeen Dad Soomaali nala ah .

Kuwii dhaqankaas lahaay xiligaan waxeey isku bedeleen

BURCAD BADEED Aduunka eey ka wada qeeyliyeen .

-Soomaali dhibkaas ayaa ka jiray markii JABUUTI la wada tegay lana doortay C/QAASIM.

-SHIBILI xiligaas FATWO ayoow soosaaray kuna diidan yahay Doowladii CARTA.

-isla xiligaas Xamar xaafadeeda SIISII wiilal ayaa isbaaro utiilay.

Gabay guuroow ah ayeey tiriyeen waxeey dheheen;an sabar suuq ka iibsa maa ninka sitaan kasiibahaa;

-Shiiq Shibille wadaad xog ogaal ah hadoow ahaay

Doowladaas ma oowsan  diideen .

-Safka SALAFIGA  ama Reer AALA-SACUUD Sheeq Cumar FAARUUQ

Fatwadiisa ayaa hiil u noqotay bulshadeena.

Isaga ayaa dhaariyay xildhibaanada lagu soo doortay halkaas.

-25 sano kahor wadaadkii wax gaaleeysiinaayay isla isagaas ayaa SHEEKHEENA gaalnimo ku genay .

SHIBILLI waxoow iska jeclaan lahaay in SHACABKAAN laga dhex waayo hal qof oo ASHCARI ah .

-marduufka maqaalka waa hore ayoow iga xirmay.

Intaasna waxaan u qoray ayaa ah is xusuuxin xaaladaha lasoo maray ninka aan ka hadleeyno nin fikir ahaan u koro ma ahan.

Waa muqalid maan xiran waxa oow aqriyo waa Buugaag inqaastooda qalalantahay balse qalbigiisa ILHAAM kuma sooduxo

-Wadaad KHAWAARIJ ah oo Qaahira degan, Fatwo inta oow saaro ama Fiidiyoow iska soo duubo hebel oo Xamar ku sugan hala soo dilo intoow dhaho isna Dhulka Masaarida nabad kuma dhexjoogi doono, hala soo dhiibo hebel, xili la dhihi doono ayaa jiridoonto.

- Dadka qaar AAKHIRO kama baqaan. sida Imaam Cumar sheegay ayaa dhab ah. Seefta inteey toosiso Musxafka ma toosiyo ayoow yiri.

-Caruur akhlaaq daran oo aad u taageersan Shiblle ayaan arkaayay. Sheekh KISHKI Sawirkiisa ayeey ku dul dhejiyeen Catabka.

-Arday Ashcari ah hadoow ficilkaas mid lamid ah ku dhaqaaqo Sheekh Shibille Sawirkiisa ku dul dhejiyo astaanta Masiixiyada ,ardaygaas afbuuxo Ayaan ku dheheeynaa waad u geftay wadaadka.

Anshaxa Islaamkana meel ayaad uga dhacday ee u soo laabo anshaxa suuban .

Diintana sidaas looguma gargaaro.

-Xayeesiinta G00GLE & Internedka oo Lacag laga helo Dhalinta maanta nool Waxbadan oo laga wiswiso ayeey u sameeyaan lacag darted.

- Xamaali ayaa dhaamo Gaari-gacan in aan qaato ama Xaaqin, aan dhulka soo xaaqo sidaasna lacag ku helo ayaa xalaal ah, inta aan Qof Muslim ah ama Gaal ah aan wejixumeeyn lahaay.

-Culimada Reer Aala Sacuud

maxaa loo waayay Kitaab eey qoreen oo ka waramaayo Akhlaaqda Islaamka?.

-Culimadeena ASHAACIRO Kutubada eey ka qoreen Akhaalqda halasootiriyo hadii la dhaho

BUUG ayaa laga alifi karaa balse maqaal laguma soo koobi karo.

-Kitaabka AKHLAAQDA Qur'aanka waxaa qoray DARAAZ

800 oo bog ayoowna ka kooban yahay.

-Imaam Algazaali Kitaabkiisa ;Ixyaaga; qeeybo kamid ah Akhlaaqda ayoow uga hadlay.

-Ubadka aan wax bareeyo Akhlaaqda aan ku abaabineeyno

Ma ahan ISBAARO Culimada u dhigta weliba Masaajidka hortiisa dhigta sidaas kuma abaabino Ardaydeena

Culimada qaar ee naga aragtida duwan Ayaan ula jeedaa.

Gacmaha ka dhunkada kana duceesta Culimada naga fikirka duwan weliba marka Cimaamadooda dhulka ku dhacdo kor ugu soo qaada waa sidaas sida aan Ardaydeena bareeyno.

-Sheeq SHIBILLE hadii aan wax ka sheegnay sharaftiisa meel ugama dhicin balse manhajkiisa ayaan daadifeeyay, Diinta yaanan laga qaadanin ma dhihin .

Diinta 1300 oo sano kahor ayaa la kala qeeybqeeybsaday Imaam Maalig,Abuu Xaniifa,Imaam Shaafici

Intaas oo mad-hab ayaa loo kala baxay.

Waana Sunada Eebbe in lees qilaafo

Sheeq Shibille Kutubada Imaam Shaafici Ayaan ku mideeysan nahay.

Isaga ayaa Minhaajka noo aqrinaayo sidookale Safiinada&Abuushujaaca .

Balse CAQIIDO waan ku kala tagnay.

Halka mudan in lagu baraarugo ayaa halkaas ah.

-ASHAACIRO ayaa nahay.

Imaam Abuuxasan Al ashcari ayaa imaam keena ah

Maqaal hore ayaan waxaan ku qoray Imaam Shaafici hadoow soonoolaado

Oowna Caqiidada Ashaaciro iska diido isaga. Shaafici Imaam nooguma ahan Caqiidada. sida loo fasiraayo Aayadaha Quraanka siiba Aayadaha ku saabsan Caqiidada.

-RUUSHKA&ROOMA waxaa ka dhexeeyo Injiilka balse Fasirka ayeey kukala tageen.

Inaga&Salafiyada waxaa naga dhaxeeyo Quraanka balse qaabka loo fasiraayo waan kukala tagnay  meelaha qaar .

-Culimada Islaamka wada shaqeeyn ayaa ka dhexeeyso cilmiga weey kala ergadaaan

Anigaan hadeer maqaalka soo qoray TAFSIIRKa Qur`aanka ee AFSOOMAALIGA ah.laba  Kitaab ayaa Gurigeeyga taalo

Labadaasna cida qortay waa reer Aala Sacuud.

Xasan Yacquub 2010.

Iyo midka kale ee la qoray 1990-kii.

Markeey wax qaldaan kuwaas, halka aan ka saxo ayaa ah Tafsiirka FAKHRADIIN ALRAAZI.&Kutubadan waa weeyn ee Af-carabiga ku qoran  eeyna qoreen ASHAACIRO.

- waxaan arkaayay wiilal  xamaasad la xiiqsan,oo Xadiiska Nabiga  ayaan difaaceeynaa hoowshooda noqotay.

Waxaa qurux badneed in eey Bukhaariga Afsoomaali ahaan u tarjumaan eeyna Suuqa noo keenaan si aan uga iibsano sida Xasan yacquub oow Quraanka ufasiray noogu soo Afsoomaaliyeeyaan hoowshaas aadka u baaxada weeyn.

-ASHCARI hadii aad tahay  la xamaasadeeysan Axaadiista Nabiga .  Imaam Muslim Kitaabkiisa,  Afsoomaali nooga dhig Qoraal ahaan.

NEDKA waad ka heli kartaa isaga oo Mp3  ah Afsoomaalina lagu aqrinaayo (DOC) ka dhig ama (Pdf)

Kadibna Suuqa keen halagaa iibsadee.

SOOMAALIDA waxaa u fudud kaalay aan kula murmo balse qoraal markeey tahay & cilmiga oo Umadaan loo qoro dhib ayeey ku tahay.(AI) ayaa hoowshaas qaban doono

Goor aanan fogeeyn .

========================================

>>DHAMAAD<<

========================================

#CAQIIDO

#MIINLEEY,2024

(caqiidadeeyda miinleey.)

marhoraan ka-maray dhaar inaanmaanso tiriyaaye miinleeyda waasheeko maanso loo ekeeysiiyay.

Anigaan macbuudkeeyga Lafo&maqaar maahan

(Tabaraka allaah,axsanalkhaliqin)

Masalana masiisaarna,markalana masoosaarna,mid Malaa`ig sido maahan .Makhluuqaadka gebigoodba mid maciin karabo maahan.

-Macbuudkeeyga Anigaan mid lalamidoobi-karo maahan, iskumilan midkaas sheegay markahoraaba maankaaga makhluuq caabud kaeheeyde, mahwigana adaakeenay,doodeeydaan murankeeda.

-Jibriil & Muxamadkeena mursaliinta gedigood mideey lamidoobi-karayaan maahan.

-meelo badanba,Diinteena Nabigeey amaantaaye, Misbaaxda & nuurkeeda,waxa eeylameeljoogtay Macbuudkood amaantaaye, ileeskaas,inoo muuqdo waa makhluuqe Illaah maahan.magacyaa nalooshegay sifo muuq-uyeel maahan. Quraankana kasoobaaro

sifo maba naloosheegin .mardanbaa nalookeenay, Quraankeena kuma qeexna Illaah muuqdo sifahiisa

. =============

Miinleeyda 2-aad.

(carshiga)

-Aniga maanso maaqaano misbaax-surantay maankeeyga ayaan miinka kahingaadshay.waana sheeko miinleey ah. Carshigana,maciindoonka,Malagaaxanbaaraayo,moowlaheeyga mabasaarna.kursigaa-lameeljoogo. Makhluuqaadka gedigoodba moowlaheena umabaahna

(idaasalka,cibaadii,canii)

mid dhawaansho lagusheegay kacbadow mushaaxaahe ukaalaya miyoowsheegay kii Keenya kadhawaaqay.

=============

#Miinleeyda,3-aad.

-Anigaan macbuudkeeyga

Miskiga udgoon maahan sida Timir macaanmaahan humaaga&muuqaalka intamaanka sawirtoodhan moowlaheeyga kaas maahan.

-Muruq&awoodeeyda intaan miinka kahingaadshay mahadeeda Rabigaa leh. -ma lulmoodo manaliico inta hurdo masootooso.

-Quraan waaye masxafkeena,isagana makhluuq waaye.

(waa makhluuq kitaabkeena)

Hadaad muran kakeentana maxaa maktabada iisaaray?.

marka moowdka ihaleelo aakhiro markaan joogo Albaqraa imaaneeyso,igu Sawir hajoogtee Alcimraan agjoogsaday Ilaah maan agjoogaa . Quraan iimaciinaayo Sida Nabiga soow maahan. In makhluuq Kitaabyahay Bukhaaraa marhore qiray.ana waan kameersaday. -miinleeyda aantiriyay horay-maanan uaqoonin . Muuqmaleh macbuudkeeyga. Muuqlaay hawana maahan. Nabi Muxamad udgoonkiisa miskigoow lameeljoogay. intasoo`udgoontiyo,intakalee,udgoonlaay ILLAAHEENA saasmaahan. -- Moowduucaan caqiidada marhoraa aqiinay,Waamiraha toowxiidka

Balse MIINKA SHEEKADA weligeey maweeleeyn.

>>DHAMAAD<<

========================================

# #HORDHACA. .3-AAD

Sida nacasyada Siyaasiyiinta ah

ee aanan AQLIGA tixgelinta siinin

Sidooda oo kale kuugu sheekeeynmaayo

Balse Garaadkaaga ayaa ah waxa aan tixgelindoono, waayo

AQLIGA  ayaad ISLAAMNIMADA ku qaadatay kuna garatay

in Nabi Muxamad diintiisa run tahay oowna yahay

Sida Nabi Muuse  Adoon Eebbe soo diray.

AQLIGA ayaad ku garatay in Nabi Ciise oowsan noqon karin

Rabi la caabudo.

(inaa wajadnaa aabaa unaa...)

-Qofka waalan denbi looma qoraayo

Balse athiga  fayoow waad ka duwan tahay qofkaas waalan.

Sidaas ayoow AQLIGA agteeyda qadarin

Uga leeyahay.

-ASHCARI haduu yahay qofka aan ka hadlaayo oowna si

qaldan u daliishado Quraanka,

Qofkale oo agtiisa taagana oow si quman u daliishado Qu'aanka , qofkaas aanan ASHCAriga eheeyn ayaa mudan in lagu raaco xaqa oow sheegayo.

**TUSAALE**:

IMAAM AL GAZAALI

Waxoow yiri SIXIRKA asal ahaan waxoow ahaay karaamo lasiiyay Nabi nabiyada ka mid ah

Warkaas oow GAZAALI sheegay waxoow qilaafsan yahay Quraanka.

-labadii Malag ee BAABIL loo soodiray

waxeey Dadka dhahayeen "ha gaaloobin iska daay barashada sixirka sidaas ayeey dhahayeen.

in la barto SIXIRKA ayaa gaalnimo ah.

-Sixirka waa karaamo, Oowliyada sheeydaanka ayaana lagu gartaa.

-Nabi Nabiyada ka mid ah in karaamo looga dhigo waa wax diinta baalmarsan.

-Sixirka Cilmi Nabiyada laga dhaxlay ma ahan balse waa cilmi sheeydaan laga dhaxlay. isaga ayaana Dadka ugu macalin ahaay.

وَٱتَّبَعُواْ مَا تَتْلُواْ ٱلشَّيَاطِينُ عَلَىٰ مُلْكِ سُلَيْمَانَ وَمَا كَفَرَ سُلَيْمَانُ وَلَـٰكِنَّ ٱلشَّيْاطِينَ كَفَرُواْ يُعَلِّمُونَ ٱلنَّاسَ ٱلسِّحْرَ وَمَآ أُنْزِلَ عَلَى ٱلْمَلَكَيْنِ بِبَابِلَ هَارُوتَ وَمَارُوتَ وَمَا يُعَلِّمَانِ مِنْ أَحَدٍ حَتَّىٰ يَقُولاَ إِنَّمَا نَحْنُ فِتْنَةٌ فَلاَ تَكْفُرْ

(Albaqra.102)

------------------

**-QARASH MIYAAN** KU QAATAY CILMIBAARISTA?.

waxaa badan in Jaamacad eey soo saarto wax loogu yeero cilmibaris balse qolo ayaa maalgelinta iskaleh

natiijo lasii ogyahay ayaana ladoonayaa in laga dhex helo cilmibaaristaas.

-Aniga wax lacag ah kuma qaato qoraaladeeyda.

nafteeyda ayaan u qorayaa oo ku dabiibayaa.Nafteeyda ayaan kula doodayaa.

-Abwaan Weedhsamaa waxoow yiri"

maansada waan isku daweeyaa nafteeyda ayaan kula doodayaa.

========================================

#SUUFINIMO ku dhisan yaanan Beer la tacbanin miyaan faafinayaa?

maxaa keenay CILMI BAARISTA .

-Dajaal ileey.

-Nabi Ciise.

-Yaa-juuj.

waxyaabo dhici doono xiliga aduunya gadoonka

in aan wax ka qoro xili ADUUNYADA kale Xidigaha u dirsadeen Dayax gacmeed?.

-marka, aad sidaas u hadashid waxaan soo xusuustaa HEESTA:MAGOOL qaado.

*"Aduunyada hanweynida cilmaa loo hardamayaaye*"

*Hoobaalayoow heedhe*

*Hawadaa ragbaa tagoo Dayaxa hoos usoo deyaye.*

...

-Aqristoow Dhul hoose &Aakhiro hadii aan kaala hadlay aduunka kazaahid ulama jeedo .

Hanka Umadeena in aan hurudsiiyo ulama jeedo balse waxa taqasuskeeyga yahay ayaan ka hadlayaa .

Waana Diinta Islaamka.

-aqristoow aan ku su`aalee

HEESTAAS MAGOOL qaaday marka eey Masraxa ka qaadeeysay maalintaas  miyaad joogtay Aduunyada?.

hadii eey jawaabtaada "haa" noqotay

Aakhiro meel dheer kuuma jirto waa halka aad u socotid.

in lagaala hadlo wax badan lagaaga sheego waad u baahantahay. sanadka 2100 markoow gaaro JANO ayaad dhex joogtaa ama NAAR ololeeyso.
(fariiqun fil janati wa fariiqun fi saciir)

-JANO&NAAR meel u dhexeeyso oo lagu magacaabo BARZAKH laguna sii hakanaayo in eey jirto hadaad moodeeysid sidaas Quraanka ka dhex baar kana soo hel Aayad koleey tahay midaas oo ka warameeyso qaabka loogu nool yahay dhulkaas lagu magacaabo Barzakh.
kama soo heli doontid Quraanka dhexdiisa.
aqriso Maqaalka.

**#ASHAACIRO JIILKOODA CUSUB MA RUMEESNA CADAABUL-QABRIGA.**

halkaas ayaan uga hadlay umuurahaas.
-qisooyinka khiyaaliga ah qaabka loogu dhex noolyahay Janada qof jecel hadii aad tahay
aqriso :#MAQAALKII DENBI DHAAFKA.

Abwaan Hadraawi&Yamyam & Dadkale oo badan oo Janada la dhex geeyay loona denbi dhaafay ayaan uga hadalnay maqaalkaas. qaabka aan u qoray ayaa ah.
qaabka loo qoray Buugii "رسالة الغفران"
-------------------------------------------------------

# #AXAADIISTA.

Imaam al gazaali waa Imaamkeeyga dhanka SUUFINIMADA, Kitaabkiisa "Ixyaa culuumudiin" kama maarmo isagaas. Gazaali , Genber gaaban hadii aan udhigo, anigana  Ardaydeeyda kafilan maayo in eey iqadariyaan ,waayo Imaam keeyga ayaan maamuusi waayay
GABAY:"*ninka teyda gaasiro ayaan tiisa guriyaa*"

-IMAAM AL BUKHAARI isagana  hadii aan yaso, Muslimiinta agtooda   amaan  ka filan maayo.
Rabiga na uumay waxoow yiri
(<u>al xaq axaqu an yutabac</u>)
-Imaam Al Bukhaari Axaadiista diiwaankiisa ku qoran qeeyb ka mid ah  in la diido hadii eey tahay ILXAAD .
(<u>fa ana awalul mulxidiin</u>)

(qul in kaana liraxmaani waladun fa ana awalul caabidiina)

-Bukhaari & Muslim iyagoonan dhalanin ayeey Umadaan Islaam eheeyd.

mudo 300 oo sano lagu qiyaaso, Xadiis qoran ma jirin balse Qur`aan qoran ayaa jiray . kii ogaay waaba ogaaye kii aanan ogeeynoow hadeerba iska ogoow.

-Imaam Shaafici.

Waxoow qilaafay Imaam Maalig.

-Warbaahin xor ah lama heli karo

hadii aanan laga hadli karin oo la hareer mari karin Imaam yada.

-Abuu Xasan Al ashcari oo aan Caqiidadiisa qaatay qofkii qilaafay baan ahay ,SHaaficina sidookale ,BUKHAARI&MUSLIM ayaan qilaafay wax weeyn yeeysan kula noqonin.

-Rag waxaa jiray hoowshoodaba eheeyd in eey Nabiga ku beenabuurtaan xadiis oowsan sheegin ayeey ka faafin jireen.

-Imaamyada lixda ah wax xadiis ah looma hoos gelinin ee duuduub ku liq hadii eey sidaa tahay waxaan leenahay wax badan baan duuduub ku liqaye doorkaan waan iska deyayaa . xadiiska markoow Aayada Quraanka ah ka hor imaanaayo meel

baan iska dhigayaa Aayada ayaan ku dhaqmayaa.

Tusaale:Quraanka waxaa ku qoran Tixsi ma uumi karaan hadiii eey  awoodooda iskugu geeyaan .

-Xadiiskana waxoow noosheegayaa Nin Dajaal la dhaho oo JAREER ah oo Timo adag ayaa jiro Dadka dhintay ayoow soo nooleeynayaa isagoo GAAL ah.

Dajaalkaas dhulka ayoow amar siinayaa Dahab&dheeman wax walba oo kugu dhexjiro iska sootuf ayoow dhahayaa dhulkana amarka DAJAALKA ayoow adeecayaa.

malaha waa ka baqayaa, oo dhulka baqdin baa u geeysay in oow baadaas dhiibo.

-Qofka rabo in oow Afsoomaali ahaan u barto Axaadiista aan ka halaayo waxoow ka heli karaa maqal ahaan ama mp3   .

ww.sheekhmaalin.com

DURUUS/AXAADIIS/ 1,SAXIIXMUSLIM.

CASHARKA 261-AAD

ILAA 268-AAD.

ama Afcarabi ahaan Kitaabka Imaam Muslim. qeeybahiisa ugu danbeeyo.

-Sheeq MAALIN waa ASHCARI waana Sheeqeena waana ku kalsoonahay Diintiisa.balse waa sida Weriye hoowshiisa tahay warkaan warqada ku qoran aqri waxna haku darin waxna haka dhimin.

=======================================

**-------------**

# #AHLAL-QURAAN

-Sheekh MAXAMAD CABDU.

ayaa u aaba ah,isaga hortiis

SAXWO ma jirin.

waxoow yiri Nabi Ciise waa hore ayoow dhintay, dhulkaana uma soolaaban doono

-SOOMAALIDA dhexdeeda dhaqankaan

Waa ku cusubyahay ku dhisan QURAANKA

ayaa noo mad-hab ah Xadiiska hadoow Aayada ka horyimaado QURAANKA ayaan ku dhaqmeeynaa siiba waxa maqan ama GGEEYBKA ah.

-Qofka waxaa fiican in oowsan kooxna ku biirin haduu doonaayo in oow Qalinka xor ka ahaado, waayo koox ku biirista waxaa ku qarsoon afqabasho waxa aad doontid kama hadli kartid. naqdi ama nasteexo midna kama suuroobaan qofka koox ka tirsan.

=========================================

**#AHLAL QURAAN.**

Aayadaha Quraanka fasirkooda wax u haray ma jiraan HEENSI BAA HARAY .

Rag waaweeyn ayaa 30 xirmo wax kabadan ka qoreen Tafsiirka

.(1)

-qofka Soomaaliga ah haduu iska sheegto Suugaan yahan sida Abwaan Weedhsame, Laabsaalax,Hadraawi,Gaariye,Yamyam. ragaas ayaan lamid ahay haduu yiraahdo qofka

Waxaa la dhahayaa maxaad suuqa keensatay Suugaan ahaan?.

-Sidaas si lamid ah qofka yiraahdo ILHAAM ayaan wax ku abla-ableeynkaraa, Aayadaha Quraanka

Maxaa cusub oo Suuqa ku soo kordhisay ayaa meel u taalo.

(wamaa yaclamu tawiilahu ilaalaah wa raasukhuuna fil cilmi)

-Aniga wax cusub hadeer idiinma haayo, wax aan waa hore ka alifay Tafsiirka, fahanka cusub ee aan saaray Aayadaha Qur`aanka ayaan halkaan dib ugu qorayaa .

maadaama moowduuca aan kasoo hadlay oow yahay mid murankiisa badan doono, si loo ogaado cida maqaalka qortay aqoontiisa diineed siiba, Tafsiirka cusub.

(wa amaa binicmati rabika faxadith)

Diinta in lagu faani karo ayeey tilmaantay Aayadaas, waana sida eey u fahmeen Culimadeena.

==========================================

.(1Baraarujin Imaam Abuu xasan Al ashcari waxoow qoray Tafsiir aad u qaraweeyn balse waa dhumay ayaa la dhahay.

Imaam Fakhradiin Alraazi Tafsiirka magaciisa ku saxiixan ee maktabada dhexyaalo midkaas ayaa ah kan

Imaamka qoray, waana sida eey aniga ila tahay .
Fakhradiin markoow Tafsiirka qoraayay Cilmiga Ashaaciro kama sootegin balse isaga ayoow soo minguurinaayay kadibna waxboow kusii kordhinaayay.
-Tafsiir dhumay majiro baan dhihi rabay balse magaca ayaa laga bedelay.
-Qofka aanan ubad dhalin ayaa magaciisa dhumayaa balse sida Ashcari cilmigiisa maba dhumi karo, Ardaydiisa ayaa nool 1000 sano kabadan ayeeyna Qalinka kor usidaan.

===================================

**>>FIIRO GAAR AH. QORAALKAAN HOOSE KU QORAN WAA QORAAL AAN WAA HORE IDINLA WADAAGAY DIB AYAAN HALKAAN UGU QORAYAA.<<**

========================

# #AHLAL QURAAN

Aayadaan

(Suma radadnaahum asfala saafiliin)

Marka hore Jano ayaa nalagu dhex abuuray marka, aan Rabi ku caasinay

Dhulkaan ayaa nalagu sootuuray. hoos udaadejinta Quraanka sheegay waa dhulkaan aan ku dhex noolnahay balse sida eey dadka qaar ufasireen maahan.

Quraanka hal qof yoowsan kaligiis fasirin.

(inaa sanulqii caleeyka qoowlan saqiilan)

Hadal culus Nabigana ladhididay hadoow yahay Quraanka.

hal qof kaligiis inoow kor u hinjiyo Quraanka

kaalmo oowsan dadka weeydiisanin

dhinaca TAFSIIRKA iskuna dayo inoow kaligiis fasiro ,waxaan dhihi rabay aashaa.

hoowsha Umada hakula qabato,qof kaligiis yoowsan fasirin Aayadaha Quraanka.

siiba marka laga hadlaayo Tafsiir ILHAAM.

=================================

AHLAL QURAAN hadaa nahay

SUUQA aan kasoo adeegano Fiqhi ahaan

Kitaabka Quraanka ayaa suuq noo ah .

----------------------------------------------------

# #AHLAL QURAAN.

Isbarbardhiga Aayadaha EEBBE.

Ayatalkursi & Ikhlaas.

Qulwale waxaa looga hadlay qolada tiri Rabi Ilmo ayoow

dhalay, Aabe ayoow noqday.
kuwaas ayaa arinkooda waxba kama jiraan lagu tilmaamay.
balse xiligii Nabi Aadan noolaay cudurkaas maba jirin sidookale xiligii Nabi Muuse .
Cilmiga Aakhiro midka ugu sharafta badan waa midka ka hadlaayo wax kusaabsan Rabi.
waxaa sooraaco cilmiga looga hadlaayo Dadka siiba ruuxda dadka, sida eey u shaqeeyso.
Dadka ayaa ugu sharafbadan inta Aduunka ku dulnool.
#Kursiga waa ka balaaran yahay Dhulka &Cirkaba.
AAYADA loogu magacdaray Kursiga.
Waxeey tilmaantay KURSIGA inoow ka weenyahay todobada Samo & Dhulka
(<u>wasica kursiyuhu samaawaatu wal ard</u>)
Geel miyaa Cirbad lagu goowrici rabaa.
- Cirbada dulkeeda ama duleelka cirbada Oorka Geela maka dhex dusi karaa?.
Aqligaa diidaayo soow maahan, Quraankana Aqliga ayoow la haasaawaa.
(<u>xataa yalijal jamalu fiisamil khiyaadh</u>)
Kursiga ayaa lasooqaadaa oo Samada Aduunka ayoow Rabi

yimaadaa, halkaas ayeey ku beenoowday.

-Kursiga ayaa kabaaxad weeyn

7 Samo&Dhulkaba.

7 Shilin ayeey agtiisa ka yihiin sida oow uga weenyahay darteed.

KURSIGA weeynin intoow ka qabo ayaa loola jeedaaye.

-Jibriil ayaa samda dhexe nagu soosalaamo waana cirkaan inoo dhaw, midkaan inoo jiro cabaarka.

Bisha Soonqaadna, Jibriil dhullka ayoow usoodegaa sida quraankaba tilmaamay.

(tanazalul malaa ikatu wa ruux)

Aayatal-kursi waxa eey ka hadashay iyo Ikhlaas waxa looga hadlay hadii leesbarbar dhigo, Aayadaan ayaa kamiisaan culus.

Nabiga ayaa arinkaas la weeydiiyay, waxoow yiri Quraanka sayidkiisa waa aayada Kursiga.

-Quraanka waa sida Dahab&Dheeman lees barbardhigaayo isaga ayaan kala dooraneeynaa .

-Nabi ka danbeeyo Nabigeena , hadii oow jiri lahaay waxoow daweeyn lahaay cudurka kudhacay kuwa Rabi Sawir uyeelay, sida Lugo Gacmo Weji kadibna Kursi ku fadhiiso yiri, marna Sariir dulsaaray ama CARSHIGA.

kuwii dhahay hada kahor , Rabi ayaa Ilmo dhalay
hadii Naqdi lagu sameeyay kuwaas.
kuwaan iyagana Rabi ayeey u gefeen, balse isma oga.
Rabi ayaan jacelahay aanan cilmiga la maal-gashaneeynin iyo sixun ufahanka Aayadaha Quraanka ayaan usabab ah.
wax aadan taqasus uleheeyn waa sidaas.
(walaa yunabi uka mislu khabiir)
ASHAACIRADA qeerkamid ah & Muctazilada qaarkood waxeeyba dheheen Kursiga lasheegaayo waa madaxnimada Eebbe Mulkigiisa ayaa loola jeedaa.
Balse iyagana weey kahoosbaxday.
Dayaxa sida loo Uumay ayaa Kursigana loo abuuray xaqiiqda Quraankana in qaabkale loodhigo ma qumana halkaasna tawiil kuma haboona.
====================================

# #AHLAL QURAAN.

ama
CILMIGA QURAANKA.
Inta xiiseeyso xididaha aasan ee xigmada Quraanka ku dhex qarsoon, kana fog quraafaadka faalaloowga ama tafaafuloowga.

maantana waxaa noo fasirayaa xuruufta lasoo gaabiyay ee

Quraanka. sida "DHAAHAA"

"NUUN" iwm.

(<u>nuun wal.qalami</u>)

NUUN=Nabiga .

waa leeska soogaabshay magaciisa, Nabi nimada.

halkii laga dhihi lahaay "Nabi Alloow "

waxaa lagu soogaabiyay <NUUN>

waxaa lamid ah

<DHAAHAA>

Waxaan arkaayay mufasiriin badan oo arinkaas eey ka hoos baxday sida Tafsiirka BEEYDAAWI & Tafsiirka oow qoray CIZAD ibnu Cabdasalaam.

waxeey halkaas ku qoreen wax aanan kuba qancin.

Nabi alloow Qalinka ayaan kugu dhartaye.

Xidigaha iyo dayaxa ayoow ku dhartaa marmarka qaar.

Cilmiga bukaarta noqday ee baarixiga ah barbaarta beryahaan ma jecla, midka cusub ayeey barashada xiiseeyaan.

========================

# #AHLAL QURAAN.

CARUURTII NABIGA DHALAY, MAGACYADOODA

1) ........Al Qaasim.

2)........Cabdu Allaahi

3) .....Ibraahiim

4)...... Zaynab.

5)......Ruqayyah.

6) ......Ummu Kulthuum.

7).......Faadhimah.

---

AHLUBEEYDKA lasheegaayo waa caruurtaas Nabiga dhalay Kitaabka Quraanka waa ka waramay, balse sarbeeb ahaan ayaa loogu dhex xusay.

Aayadaan ayaa ka warantay ilmaha Nabiga dhalay.

وَلَقَدْ آتَيْنَاكَ سَبْعاً مِّنَ ٱلْمَثَانِى وَٱلْقُرْآنَ ٱلْعَظِيمَ

- Nabiga waxaa la yiri, 7 ayaan kusiinay & quraanka (cathiim)ka ah.

1400 oo sano kahor AHLA SUNAHA & SHIICADA

waxeey faafin jireen AHLU BEEDKA waa FAADUMO & Cali

& Caruurta eey dhaleen.
sheekadaas in eey qabyo tahay qoraal hore ayaan kaga soo hadalnay cida dooneeyso dib ha ugu laabato qormada ZEEYLAC-BAALI.
Soomaalida cilmi eey lagaar noqotay ayaa jiro.
FIQHI cusub eey soo kordhiyeen inoow jiro, iyadana bal aan tilmaamo .
wax hada cusub maahan, in eey Soomaalida wax soo kordhiyaan .
Axaadiista waxaa caan ku ah, Sheeq Soomaali ah kuna dhashay ZEEYLAC 800 sano kahor, ninka qoray "AXAADIIS AL HIDAAYA"
Sheekh Cusmaan Al-zeeylici isagana waa jiraa, Kutubo badan ayoow nooqoray .sideed boqol oo sano kahor ayoow noolaay sheekhaas isagana.
Dunida Muslimka culimo caan ka noqotay ayaan leenahay.
ceebna ma`ahan culimadeena in aan ku faano, cilmi aakhiro ama cilmi aduunyo hadii aanan lagu faanin.
wax lagu faano cilmi ayaa ugu fiican .
========================================

**#AHLUBEEYDKA. TACSI.**

Imaamkeena SHIICADA Aaya-tulaah
Allaha u naxariisto SHAHIIDKII QARNIGA
waa isaga. Doowlad ilbaxnimo lagaga deydo
tignoolajiyad ku hormartay SHUURO ku dhisan Shacabka oo
lala tashado ninka soo kordhiyay soow isaga maahan .
**AHLUBEEYDKA & Ilmihii Nabigeena hadii aan kor kusoo xusay HEES amaan ah ayaan ku sagootinayaa Maqaalka qeeybtiisa 1-AAD.**

HEESTAAN

magaceeda waxaa ladhahaa " DAYAXA"

NABI Maxamad AYAANA KU AMAANAYAA.

**AHLU BEEDKA AYAAN KU AMAANAYAA.**

sanadka 2025 Moowliidkii la dhigay, amaantii, Nabiga la amaanaayay xiligaas ayaan ugu talagalay.

---------------------------------

1) *Udugiisa Nabigii aadmigu hajoogee*

*Ubaxii lasoodiray la engegay ayaantii*

*Abshir Eebbe koriyay ifka lagu maneestoow.*

------------

2) *Xidigaha iftiiniyo Dayaxuna ileeyskuu ka amaahday nuurkee aragooda Nabiyada albiguu daweeyaa.*

2) *Xidigaha iftiimiyo Dayaxuna ileeyska ka amaahday nuurka , aragaadu deeymada*

*Nabigii illaahoow*

*indhahuu daweeyaa.*

.

3)*Magaciisa Nabigii lagu qoray iliilaha ..*

*Iridahafardoowsiyo*

*ka aroorshay Umadee iimaanka keenoow.*

4) *dhaqankiyo asluubtana kii lagu ilhaanshee Anbiyadi lasoodiray*

*Ilinkooda raacee Uumiyaha dhamaantood*

*U ahaay astaanta.*

(Anbiyada dhamantood imaamkoodi noqotaye.)

5) *illaaheey agtiisiyo oogada dusheesare*

*Abshir iigatimidoow ilinteeyda qubataay amaantaada waa bade ma waxaanan oranoon ka ilaawayaa jira*

5)*illaaheey agtiisiyo oogada dusheesare*

*Abshir noogayimidoow Ehlu beeydka ithilkood amaantiina waa bade ma waxaanan oranoon ka ilaawayaa jira.*

5) *Ilaaheey agtiisiyo oogada dusheesare*

*Abshir iigatimidoow*

*Nabigeeyga waa adi*

*amaantaada waa bade ma waxaanan oranoon ka ilaawayaa jira.*

5) *Ilaaheey agtiisiyo oogada dusheesare*

*Abshir iigatimidoow*

*Waan kuu ilmeeyaye amaantiina*

*waa bade ma waxaanan oranoon ka ilduufay baajira.*

===================================

# LASOCO QEEYBTA 2-AAD